



Isniin, Sebtember 13, 2021

UJ: Baadhista COVID-19 ee Gur-u-Qaadashada

Waalidiinta Qaaliga ah, Mas'uuliyiinta, Ardayda, iyo Shaqaalaha,

Caafimaadka Dadweynaha Ottawa (OPH), oo ay weheliyaan la-hawlgalayaasheenna CHEO, waxay bixinayaan xirmooyin lacag-la'aan ah xagga **baadhista COVID-19 ee guri-u-qaadashada** xagga ardayda iyo shaqaalaha iskuulkaaga kuwaas oo yeeshay astaamaha COVID-19 ama loo aqoonsaday inay la kulmeen mid halis-sare leh. In leys baaro waa tallaabo muhiim ah oo lagu garto COVID-19 laguna caawiyo joojinta faafitaanka fayraska gudaha dugsiga iyo bulshadeenna.

Xirmooyinka barista COVID-19 waxa laga heli doonaa goobta dugsigaaga iyadoo lagu isticmaali karo dugsiga ama guriga. Adeegsiga xirmada baarista waa in si taxaddar leh loo qorsheeyo si loogu oggolaado in isla maalintaas lagu soo celiyo xagga dugsigaaga (inta lagu jiro saacadaha dugsiga) ama [Xarunta Qiimaynta Brewer](#) (151 Brewer Way), saacadaha shaqada.

Waxaan rajaynaynaa in xirmooyinka baaristu ay ka fududaan doonaan xagga helitaanka baarista COVID-19 marka loo eego tagitaanka xarunta qiimeynta haddii arday ama shaqaale ay yeeshaan astaamaha COVID-19 ama ay lahaadaan kulan halis-sare leh.

Xagga Qalabka Guri-u-Qaadashada ee COVID-19:

Xirmooyinka baarista guriga loo qaato waxaa ka mid ah suufka afka iyo sanko oo ilmo ama qof weyn ay iskood u samayn karaan, ama waxaa samayn kara waalidka/mas'uulka ama daryeelaha. Baadhitaankani wuu ka sahlan yahay kana raaxo badan yahay baarista caadiga ah ee COVID-19 wuxuuna qaadanayaa kaliya ilbidhiqsiyo. Xirmooyinka baarista guriga loo qaato waxaa ku jiri doona tilmaamo faahfaahsan oo ku saabsan sida loo sameeyo baaritaanka, sida loo buuxiyo foomka ku jira xirmada, calaamadeynta iyo kaydinta muunadda baaritaanka, iyo meesha lagu celinaayo. Fadlan ogow in baaritaanada ardayga **aanu** samayn doonin ama kormeeri doonin shaqaalaha dugsiga.

Si aad wax badan uga ogaato baaristan, waxaad ka daawan kartaa fiidyow gaaban halkan:

[Sida loo sameeyo isku darka suufka soo leefista sanko iyo afka ee COVID -19 - YouTube](#)

Kadib Markaad Dhamayso Baarista:

Xirmooyinka baarista COVID-19 ee guriga loo qaadan doono waxaa heli doona ardayda iyo shaqaalaha yeesha astaamaha COVID-19 ama loo aqoonsaday inay la kulmeen kuwo halis-sare leh. Shakhsiyaadka leh astaamaha COVID-19 waxay joojin karaan is-qooniyeynta marka mid ka mid ah shuruudaha soo socda la buuxiyo:

- Natiijada baaritaanka COVID-19 oo taban (negative) ayaa la helay, shakhsigu ma laha qandho (iyada oo aan la isticmaalin dawooyinka xummad-yaraynta), astaamuhuna way



soo hagaageen ugu yaraan 24 saacadood (haddii astaamaha ilmaha ay ka mid yihiin matag ama shuban, astaamahan waa in la xaliyaa 48 saacadood ka hor intaadan ku noqon dugsiga); AMA

- Haddii aad doorato inaad isbaarin, waxay ahayd 10 maalmood tan iyo markii astaamuhu bilaabmeen, shaqsigu ma laha qandho (iyada oo aan la isticmaalin dawooyinka xummad-yaraynta), calaamadaha ayaa soo hagaagay ugu yaraan 24 saacadood (haddii calaamadaha ilmaha ay ka mid yihiin matag ama shuban, calaamadahan waa in la xaliyaa 48 saacadood ka hor inta aan lagu noqon dugsiga); AMA
- Baadhitaan kale ayaa laga bixiyay xagga daryeel-caafimaad bixiye iyadoo calaamadaha caabuqa la xaliyay, sida kor ku xusan.

Markaad dhammaystirto xirmada baarista guriga loo qaato oo aad dugsiga geysa, waxaad oggolaanaysaa baaritaanka COVID-19 adiga ama ilmahaaga. Macluumaadka caafimaadkaaga shaqsigu waa la ilaalin doonaa oo waxaa ogaan doona oo keliya kuwa CHEO iyo Caafimaadka Dadweynaha Ottawa (Ottawa Public Health) ee u baahan inay ogaadaan. Ka-qaybgalkaaga waa la mahadiyey waxayna gacan ka geysan doontaa yareynta faafitaanka COVID-19 ee gudaha bulshadeenna.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan fursaddan baarista COVID-19, fadlan soo wac Caafimaadka Dadweynaha Ottawa 613-580-6744.

Mahadsanid,

Caafimaadka Dadweynaha Ottawa